



9th-12th SEPTEMBER 2024, NAIROBI, KENYA

Jaamacadda Culuumta Caafimaadka oo ka qayb-gashay Kulankii 13th IUCEA

Golaha ka dhexeeya Jaamacadaha Bariga Afrika, Inter-University for East Africa, (IUCEA) ayaa sannad walba qabta gole aqoonyahannada iyo dadka ku hawlan hubinta tayada arrimaha la xiriira kor u qaadida hubinta tayada Tacliinta Sare, iskaashiga caalamiga ah, isdhexgalka, iyo isku-xirka ee gobolka.

Hubinta Tayada Tacliinta Sare ee Bariga Afrika (EAQAN), oo la aasaasay sannadkii 2012-kii, ayaa sannad walba lagu qabtaa madal ay isugu yimaadaan dadka ku hawlan arrimaha hubinta tayada ee Tacliinta Sare si ay uga wada hadlaan, uuna wadaagaan fikrado iyo waayo-aragnimo. Ilaa iyo hada waxaa la qabtay 12 kulan; kii 13aad oo ka dhacay magaalada Nairobi ee dalka Kenya ayaa la qabtay intii u dhaxeysay 9kii illaa 12kii September 2024.

Jaamacadda Culuumta Caafimaadka oo sannadkaan ka mid noqotay ururka IUCEA, waxaa madashaas uga qayb galay Prof. Ahmed M. Osman.

Ujeedooyinka ugu muhiimsanaa ee madasha waxay ahaayeen: 1) Horumarinta heerka aqoonta iyadoo loo marayo iskaashiga ka dhexeeya jaamacadaha bariga Afrika iyo Afrika; iyo iskaashiga ka dhaxaya jaamacadaha iyo warshadaha; 2) Sare u qaadidda fursad u helidda ka qayb qaadashada Tacliinta Sare iyadoo la adeeg-sanayo ku dhaqanka hubinta tayada cusub; 3) In laga wada hadlo, lana wadaago waayo-aragnimo ku saabsan iswaafajinta waxbarashada (credit transfer system) isdhexgalka Tacliinta sare si ay fududaato dhaqdhaqaaqa shaqaalaha iyo ardayda (staff and student mobility); 4) In laga wada hadlo doorarka ay tiknoolajiyadda digital-ka iyo Artificial Intelligence (AI) ku leedahay Tacliinta Sare.

Mawduuc kasta oo la soo jeediyo waxaa xigay doodka ka qayb-galayaasha madasha. Qodobadii ugu muhiimsanaa ee laysla gartay waxaa ka mid ahaa in lays waafajiyo nidaamka waxbarashada (credit transfer system) si loo fududeeyo isu-socodka ardayda ee Jaamacadaha Bariga Afrika; kor u qaadidda, iyo xoojinta tiknoolajiyada digital-ka ee Tacliinta Sare. Prof. Cusmaan ayaa ka qayb qaatay ka doodidda tiknoolajiyada iyo sirdoonka macmalka ah ay ku leedahay tayaynta tacliinta sare. Waxaa xoogga la saaray tiknoolajiyada soo koraya, sida AI, in kor loogu qaado; caqabadaha ugu muhiimsan ee jaamacaduhu wajahayaan dhinaca kor u qaadista tiknoolajiyadaas; Kobcinta fursadaha waxbarasho iyo xirfadaha ee ardaydu u baahan tahay si ay ugu guulaystaan mustaqbalka dhaw Tiknoolajiyada AI.

Ugu dambeyntii, laga bilaabo 9:00-15.00 ee maalmintii 12aad waxa ay ka qaybgalayaasha EAQAN la kulmeen Erasmus-NA DAAD Germany (Iskaashiga Waxbarashada Sare ee EU-da-Jarmalka iyo Bariga Afrika). Kooxda Jarmalku waxay soo jeediyeen bandhigyo ku saabsan fursadaha maalgelinta Erasmus ee dalalka Afrika. Gebogebadiina, madashu waxay ahayd mid lagu guulaystay oo si habsami leh loo maareeyo.





**9th To 12th September 2024
Safari Park Hotel, Nairobi Kenya**

Participation of the University of Health Science, Somalia




**9th To 12th September 2024
Safari Park Hotel, Nairobi Kenya**

Participation of the University of Health Science, Somalia



**9th To 12th September 2024
Safari Park Hotel, Nairobi Kenya**

Participation of the University of Health Science, Somalia



**9th To 12th September 2024
Safari Park Hotel, Nairobi Kenya**

Participation of the University of Health Science, Somalia



**9th To 12th September 2024
Safari Park Hotel, Nairobi Kenya**

Participation of the University of Health Science, Somalia



**9th To 12th September 2024
Safari Park Hotel, Nairobi Kenya**

Participation of the University of Health Science, Somalia

